

Suʼaalaha caadiga ah iyo jawaabahooda

F: Ma haysto BankID.

S: Wakhtigaan la joogo waa khasab in BankID la haysto si loo diiwaangeliyo tijaabada. Haddii aadan haysan BankID waa in marka koowaad aad email ugu soo dirtid [covidundersokning@vgregion.se](mailto:covidundersokning@vgregion.se) xogta loo baahan yahay si loo diiwaangeliyo tijaabadaada.

F: Ugama qaadi karo ilmahayga tijaabada sida ku qoran tilmaanta.

S: Waan fahamsanahay inay adkaan karto, tus. in ilmo yar tijaabada dalqada laga qaado ama candhuuf ay ku uruuriyaan koob. Markaas waxaa lagu beddeli karaa in qoriga suufka leh afka lagu haysto 10 ilbiriqsi si loo uruuriyo dheecaanka iyo candhuufta. Xittaa haddii aad ku guulaysatid inaad tijaabada hal ama labo meelood ka qaadid (dalqada, sanko, candhuuf) waxa jira jaanis fiican oo fayruska lagu ogaan karo.

F: Ma hubo inaan si sax ah u diiwaangeliyay tijaabada.

S: Tijaabada waa la diiwaangeliyay markii aad timaadid bogga "Ditt prov är registrerat". Haddii aadan isku hubin inay sax noqotay sababtay rabtaba ha keentee waxaad geli kartaa "Provsvar" oo ku jirta direkttest.se. "Testresultat är ej tillgängligt" micneheedu waa in tijaabada la diiwaangeliyay laakiin baaritaankii uusan dhammaan. "Det finns inget prov registrerat" micneheedu waa in aadan tijaabada si sax ah u diiwaangelin oo sidaas darteed ma jiro xiriir ka dhexeeya adiga iyo tijaabadaada nidaamka (systemka) ku jirta.

F: Wakhti intee leʼeg bay qaadanaysaa intaan jawaab ka helayo?

S: Caadiyan waxaad jawaab ku helaysaa 72 saacadood gudahood laga soo bilaabo markii aad tijaabada celisay. Mararka qaarkood wakhti intaa ka badan bay qaadan kartaa, ugu badnaan 7 maalmood.

F: Yaan ula tagayaa suʼaalaha aan qabo haddii jawaabto haa noqoto (xanuunka la iga helo)?

S: Akhri marka koowaad warbixinta ku jirta direkttest.se. Haddii sidaas oo ay tahay aad suʼaalo qabtid waxaad email ahaan ku waydiin kartaa [covidundersokning@vgregion.se](mailto:covidundersokning@vgregion.se) ama adeeggeena telefoonka (010-4739450).

F: Haddii xanuunkaygu kasii daro maxaan samaynayaa?

S: Haddii aad u baahan tahay taageero ay ku siiyan daryeelka caafimaadku ilmahaaga oo astaamo cudur oo cadcad leh darteed waxaad samaynasaa sidii caadiga ahayd. Waxaad la

xiriiraysaa 1177 ama dhakhtarkaaga tusaale ahaan rugta caafimaadka aad ka qoran tahay jooga.

F: Waa maxay "biobanking" oo maxay ku fiican tahay?

S: "Biobanking" micneheedu waa in tijaabada aad soo dirtid qaboojiye la gelinayo oo la keydinayo si mar kale loo isticmaalo. Cilmi baarayaal iswiidish ah baa kaddib oggolaansho ka codsan kara hey'adda anshaxa si ay tijaabada ugu isticmaalaan cilmi baaris. Iyadoo aan la helin agab ay ku deeqeen dadka tijaabooyinka laga qaadayo cilmi baarayaasha Iswiidhan fursad uma heli doonaan inay cilmi baaris muhiim ah kusii sameeyaan covid-19. Sababtaas darteed waxaan kaa codsanaynaa inaad taabatid afar geeska oggolaanaya "biobanking" markii aad ku diiwaangelinasid tijaabadaada QR-kod ama direkttest.se. Ikhtiyaar buu qofku u leeyahay.